Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad
Documentiga Kal.8-aad kul.1-aad **16/04/2016**

Kalfadhiga 8-aad
Kulankiisa1-aad Saac.fur.12:52gh.Saac.Xir.1:50gd.
Guntinta(Quorum) 145Xildh.
Ajendaha:-

1. **Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah**
2. **Ansaxinta Ajendaha**
3. **Akhrinta Heshiiska u dhaxeeya Soomaaliya & Turkiya kuna saabsan wada shaqeynta dhanka Caafimaadka iyo Aqoonta Caafimaadka.**
4. **Akrinta 2–aad warbixinta Guddiga Arrimaha Gudaha ee ku saabsan Hindise Sharciyeedka Dhismaha Xisbiyadda Siyaasadda.**
5. **Mooshin ku saabsan dib-u-dhigid maamul u sameynta Hiiraan iyo Shabeelaha Dhexe.**

1.Shir-guddoomiye , Guddoomiye K/X.1-aad Baarlamaanka JFS. Mudane, Jeylaani Nuur Iikar Waxaa shirka Furey Guddoomiye K/X.1-aad Baarlamanka JFS. Mudane Jeylaani Nuur IIkar. Waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka Kariimka uuna akhriyey Xildh. Maxamed Axmed kulalihi .

2.Guddoomiyaha , wuxuu sheegay in Ajendaha Maanta uu yahay akhrinta heshiiska u dhaxeeya Soomaaliya & Turkiya kuna saabsan wada shaqeynta dhanka caafimaadka iyo aqoonta caafimaadka ,Akhrinta 2-aad warbixinta Guddiga Arrimaha Gudaha ee ku saabsan Hindise Sharciyeedka Dhismaha Xisbiyada Siyaasadda iyo Moshin ku saabsan dib u-dhigid maamul u sameynta Hiiraan iyo Shabeeladda Dhexe.

3.Guddoomiyaha ,wuxuu u tacsiyadeeyey Xildh. Xuseen Carab Ciise oo hooyadii geeriyootey wuxuu Illaah ugu baryey in uu geeyo Jannadii Ferdowsa Eheladii ay ka baxdey samir iyo Iimaan in uu ka siiyo .

Wuxuu kaloo sheegay in Guddiga Joogtada ah iyo Guddiga Dastuurka ay beri isugu yimaadaan Villa Hargeysa saacaddu markey tahay 11:00 gh,Xildhibaanadda kale ee doonaya in ay ka soo qeybgalaan ay ka soo qeybgalikaraan.

Kadib , wuxuu u yeeray Wasiirka Caafimaadka Marwo Qadro si ay u akhriso Hindise Sharciyeedka heshiiska wada shaqeynta dhanka Caafimaadka Soomaaliya iyo Turkiga iyo Aqoonta Caafimaad oo maraya akhrinta 2-aad.

4.Wasiirka Caafimaadka Marwo Qadro , waxay akhrisey heshiiska u dhaxeeyo Soomaaliya iyo Turkiga ee Caafimaadka iyo Aqoonta Caafimaadka. Waxay sheegtey in heshiiskaan uu faa'iido weyn ugu jiro dadka Soomaaliyeed wuxuuna ka kooban yahay ilaa 10 qodob ,waxaa ku jira sinnaanta iyo wax isdhaafsiga aqoonata Caafimaadka ,waxay ka koobanyihiin (2)laba dhinac . 1-Sinnaanta iyo wax isdhaafsiga aqoonta Caafimaadka sida: hakinta cuduradda Caafimaadka iyo adeega caafimaadka dhimirka. Qod.3-aad waa qaabka wada shaqeynta iyo isdhaafsiga khubaro iyo Howl-wadeeno Caafimaad . Qod.9-aad oo ah Xalinta khilaafaadka ay noqondoonto in lagu dhameeyo wada xaajood. Qod. 10-aad uu yahay sida loo hirgelinayo heshiiskaan soconaayo 5-ta sano iyadoo loo maraayo qaabka shuruucda heshiisyadda,
Kabixidda heshiskaan waa in la sheegaa 6 -bilood ka hor inta aan la hirgelinin socodka heshiiska.
Ugu danbeyn, waxay soo jeedisey in la ansaxiyo heshiiskaan taa oo wax weyn iska bedelidoonto Soomaaliya,waxay codsatey in la ansaxiyo heshiiskaan.
Xildh.Cabdi shire , wuxuu sheegay in uu aad ugu mahadcelinaayo Wasiirka Caafimaadka marwo Qadro sida ay u akhrisey sharciga heshiiska caafimaadka ,wuxuu soo jeediyey in loo celiyo dhaqaatiirta Soomaaliyeed si ay wax ugu bedelaan .
5.Guddoomiyaha ,wuxuu sheegay in tala soo jeedinta Xildhibaanadda lagu soo daro Hindise Sharciyeedka Caafimaadka.
Xildh. Sacdiyo Careys waxay sheegtey in aan loo codeynin sharcigaan sida horey loo sheegay.
6.Guddoomiyaha wuxuu sheegay in cod la gelinaayo heshiiska sharciga caafimaadka ,wuxuu u dhacay sidatan:
136 -Xildh. way ogolaatey
3-Xildh. way diidey
3-Xildh.way ka aamuseyn
Guddoomiyaha wuxuu sheegay in sharcigaan uu ansax yahay.
7.Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Gudaha Mudane Daahir Amiin Jeesow si uu u akhriyo **Hindise Sharciyeedka Xisbiyadda Siyaasadda** .
Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Gudaha Mudane Daahir Amiin Jeesow , wuxuu akhriyey akhrinta 2-aad ee warbixinta Guddiga ee ku saabsan Hindise sharciyeedka dhismaha Xisbiyadda Siyaasadda. Wuxuu sheegay in u ka koobanyahay 38 qodob uuna muhiim u yahay dalka ,wuxuu intaa ku darey in qodobo qaar loo rarey qodobo kale sida qod.1-aad waxaa loo rarey qod- 38aad,qod.6-aadna waxaa laga dhigay cinwaanka, Qod.31 waa laga saarey Maxkamadda Xisbiga waxaa la siiyey Maxkamadda heer Gobol.Qod.14-aad wuxuu ka hadlayaa Diiwaangelinta Xisbiga ,Maxkamadda Dastuurka iyo heer Gobol iyo heer Degmo .
Sharcigaan 4 -qeybood ayuu ka kooban yahay waana 34-qod. Iyo 4-jaad.waxayna kala yihiin sida tan:

- Qod.1 ilaa 3 ,wuxuu ka hadlayaa Muuqaalka Guud
- Qod. 4,wuxuu ka hadlayaa Habka Diiwaangelinta Xisbiga shuruucda iyo habraaca.
- Qod.24 ilaa 32 wuxuu ka hadlayaa Maalgelinta Xisbiga iyo xadgudubyada .
- Qod.33 ilaa 38 wuxuu ka hadlayaa xadgudubyada
- Qod.3-aad Heshiiska Isbeheysiga Anshaxa iyo Racfaanka.

Guddoomiyaha Guddiga **,**wuxuu intaa ku darey in sharcigaan uu yahay muhiim waana midkii looga bixilahaa dhibaatada maanta taagan ,waa akhrinta 2-aad .wixii aaraa ah ay hayaan xildhibaanada wuxuu sheegay in ay ka sugayaan. Qod. 37-aad far. C iyo Qod.31-aad far.1-aad wuxuu sheegayaa in Guddiga Diiwaangelinta ay ugu mid noqdaan 2-xubnood oo ka socda Axsaabta Siyaasadda .

8.Guddoomiyaha Mudane Jeylaani, wuxuu soo jeediyey in sharcigaan si weyn loo soo akhriyo waana arrin muhiim ah.

9.Intaa ka dib, Guddoomiyaha wuxuu u yeeray **Xildh. C/llaahi Goodax Barre** si uu u akhriyo Motion-ka la keenay oo ah Maamul u sameynta Goboladda Hiiraan iyo Shabeeladda dhexe .

Xildh. C/llaahi Goodax Barre ,wuxuu akhriyey Motion-ka Maamul u sameynta Goboladda Hiiraan iyo Shabeeladda Dhexe,taas uu sheegay in ay soo qoreyn **42-Xildhibaan.**

10.Guddoomiyaha wuxuu sheegay in arrintaan ay tahay mid muhiim ah loona baahanyahay in la sakangareeyo.

Xildh.Khadiijo Maxamed Diiriye,ayaa sakangareysey(ayidey) soo jeedinta Motion-ka Maamul u-sameynta Goboladda Hiiraan iyo shabeeladda dhexe.waxayna sheegtey in Baarlamanka uu horey u go'aamiyey in rabitaanka shacabka la tixgeliyo .waxayna codsatey dhibaatada holaca badan in codkiina ku kabtaan , Ra'iisul Wasaarahana uu hakiyo howsha hadda socota.

Xildh. Daahir Amiin Jeesow, wuxuu sheegay in shirka Jowhar laga furay uu galey wajigiisa 2-aad ,waxaana jooga odayaasha ,wuxuu soo jeediyey in dib-u-eegis lagu sameeyo mana aha in lugta layska jabiyo,Qaraarkana cod la geliyo.

Xildh.Jawaahir,Waxay sheegtey in xildhibaanada ay xaq u leeyihiin in Motion ay keenaan Qaraarkaana waxaa la rabaa in wax lagu dumiyo,waxay soo jeedisey in wax la saxo oo si nadaam ah wax loo saxo.

11.Guddoomiyaha Mudane Jeylaani, wuxuu sheegay in codeynta ay u baahantahay Courum(Guntin) ah **50+1 cod aqlabiyad.**

Kalfadhiga 8-aad kulankiisa 1-aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiye K/X.1-aad Mudane Jeylaani Nuur Iikar ,wuxuu sheegay in uu shirka xiranyahay saacaddu markey aheyd 1:48gd.